



## Dugsiga Hoose ee Capitol Hill oo ku tababaranaya jawaabaha uu guud ahaan dugsigu ka bixinayo xaaladaha degdeg ah

Haddii ay dhacdo in uu dab kaco, ardaydu waxay og yihiin in ay uga baxayaan dhismaha jihada ay ka xigaan macallimiintoodu. Haddii uu dhaco dhulgariir, ardaydu waxay og yihiin in ay isku diyaariyaan in ay hoos galaan miisaskooda isla markaana ilaaliyaan madaxooga iyo qoortooda. Laakiin maxaa dhacaya ka dib dhacdooyinkaasi? Maxaa dhacaya haddii dugsigu burburo ama gubto? kaasi oo ardayda iyo shaqaalaha ka dhigaya in aysan haysan hab ay kula xiriiraan waalidiinta iyo qoysaska?

Toddobaadkii la soo dhaafay, Dugsiga Hoose ee Capitol Hill wuxuu isku dayey in uu ka jawaabo isla su'aalahani.

Maamulaha Joy Williams waxay go'aansatay in tababar lagu qaato nidaamka dugsiga ee loogu talagalay "dib-u-mideynta" ardayda ee qoysaskooda ka dib xaaladda degdeg ah. Xaalad degdeg ahi waa wax kasta oo ka saaraya ardayda jadwalkooda caadiga ah ama hawlaha dugsiga, sida dabka, duufaanka barafka wata, dhulgariirka ama qof wax tooganaya. Iyada oo loogu talagalay tababarka layli, iyo si ardayda looga dhigo in ay isku dajiyaan sida ugu suurtagalsan, Williams waxay go'aansaday in uu ardayda u sheego in ay tababar ku qaadanayaan dib iskugu imaanshaha 'reunification' dhulgariirka ka dib.

"Wax badan ayaan ka baranay gurmada xaaladda degdega ah ee guud ahaan dugsigeena kaliya dejinta aanu dejinay qorshaheena dib-u-mideynta," ayay sheegtay Williams. "Si loo xaqiijiyo in tababarka layli u socdo sida ugu wanaagsan ee suurtagalka ah, waa in aanu raadino khataraha imaan kara inta lagu jiro dhismaha isla markaana qiyaasno dhammaan siyaabaha dib iskugu imaanshuhu u qaldami karo. Kaliya samaynta tababarkaasi layli wuxuu xoojiyay awooddeena si aan si la taaban karo ugu adeegno ardaydeena marka ay jirto xaalad degdeg ahi."

Noofambar 14, qoysaska doortay in ay ka qayb qaataan tababarka layli waxay saf ka galeen bannaanka albaabka laga soo gelayo qolka jimicsiga, iyaga oo sugaya 1 galabnimo, marka tababarka layligu uu ahaa in uu bilaabmo. Waxaa meesha joogay qoysas fara badan, safka lagu jiray wuxuu gaaray ilaa qaybta ka hore ee dhismaha.

Waalidiinta, mas'uuliyiinta iyo saaxiibada qoyska ayaa buuxiyay foom ay ku qoran magacyada ardayda ay qaadayeen, waxayna soo buux dhaafiyeen qolka jimicsiga si ay ula hadlaan shaqaalaha dib iskugu imaanshaha. Shaqaale ku jiray qolka jimicsiga ayaa farriin raadiyaha ugu diray macallimiinta fasallada iyo tabarucayaasha joogay hoolasha la maro si ay u ururiyaan kooxo carruuro ah, walaalo ah ama saaxiibo ah midkood ee dib iskula midoobayay, waxayna keeneen qolka jimicsiga. Dadka carruurta qaadayay waxay keeneen foomkii ay buuxiyeen, iyada oo saxiixay in ay tageen iyaga oo wata carruurta ay ahayd in ay la tagaan.

“Dhammaan marka la isku daro, tababarka layli wuxuu u dhacay si aad u wanaagsan,” ayay sheegtay Williams. “Waxaan awoodnay in aanu dhammaan carruurta dib iskula midowsiino qiyaastii ilaa 45 daqiiqo, iyada oo hal arday oo keliya uu meesha ku haray isaga oo ooyaya—wuxuu ka xanaaqay in uu ka maqnaado fasalka xisaabta ee maalintaasi.”

Williams waxay aaminsan tahay in tababarka layli ee dib iskugu imaanshaha lagaga dhaqmo guud ahaan degmada wuxuuna diyaar u tahay in uu ilo ahaan ugu adeego maamulayaasha kale.

“Waa fahamkaygu in aan nahay oo kaliya dugsigii saddexaad ee tababar ku qaata dib iskugu imaanshaha,” ayay sheegay. “Waxaan si aad ah ugu talin lahaa dhammaan dugsiyada degmada ku yaala ay ugu yaraan maraan habka qorshaynta dib iskugu imaanshaha. Taasi oo keliya waxay dugsiyada ka dhigi kartaa in ay si wanaagsan u diyaar garoobaan u adeega bulshadooda marka ay jirto xaalad degdeg ahi.”

*-Laura Hanson*